

Xaqiiqooyinka:

Ku Saabsan Nidaamka Xeerka Naafada ee Shaqaalaha

Qorshaha Nidaaminta Shaqaalaha Naafada ah wuxuu na bilaawday 1 Luulyo 2020. Waxaana kamid ah:

- Xeerka Anshaxa ee dhammaan shaqaalaha naafada ee Fiktooriya
- shuruudaha ogeysiinta khasabka ah ee bixiyeyaasha iyo shaqaalaha si ay u soo sheegaan walaac laga qabo in shaqaale naafonimo ah uu khatar gelinayo ammniga
- adeegyada cabashooyin ka madaxa banaan ee halkaas looga warbixinayo tayada iyo ammniga walaac kasta oo shaqaale naafaded e Fiktooriya.

Ku saabsan Xeerka

Xeerka Anshaxu waaqalab muhiim ah oo dadka naafada ah looga ilaaliyo waxyeellada iyo xadgudubka iyada oo la dejinayo waajibaadka saaran shaqaalaha naafada ee aan diiwaan gashanayn ee Fiktooriya ay tahay inay u hogaansamaan. Xeerka Anshaxa ayaa loo adeegsan doonaa dhammaan shaqaalaha naafada ah, iyadoon loo fiirin haddii lagu maalgeliyo NDIS ama bixiyeyaalka kale.

Xeerka Anshaxa ee Ilaalinta Adeegyada Naafada (Xeerka) ayaa lagu qeexay Xeerarka Ilaalinta Adeegyada Naafada ee 2020, kuwaas oo ah xeerar lagu sameeyay *Sharciga Ilaalinta Adeegyada Naafada ee 2018* (Sharciga).

Xeerku wuxuu qeexayaa waajibaadka saaran dhammaan shaqaalaha naafada ee Fiktooriya inay u hogaansamaan wuxuuna siiyaa halbeeg looga ilaaliyo dadka naafada ah waxyeellada iyo xadgudubka.

Xeerka waxaa loogu talagalay inuu kaabayo Qaabdhismeedka Tayada iyo Badbaadinta NDIS si kor loogu qaado shaqaale naafonimo oo badbaado iyo xirfad leh oo ku dhex nool Fiktooriya. Xeerku wuxuu dhaqangelinaya Xeerka Anshaxa NDIS, kor u qaadida joogtaynta shuruudaha habdhaqanka shaqaalaha ee Fiktooriya, iyadoon loo eegin haddii lagu maalgeliyo NDIS ama bixiyeyaalka kale.

Yuu Quseeyaa Xeerka Anshaxa?

Xeerku wuxuu khuseeyaa dhammaan shaqaalaha naafada ah ee u shaqeeya ama haddii kale ku hawlan bixinta adeegyada naafada ee Fiktooriya, iyadoon loo fiirin ilaha maaliyaddooda.

Ku saabsan ogeysiisyada

Qof kastaa wuu noo sheegi karaa walaac laga qabo in shaqaale naafonimo ah uu khatar gelinayo nabadgelyada. Tani waxaa loo yaqaan 'ogeysiin'. Sida uu dhigayo *Sharciga Ilaalinta Adeegyada Naafada ee 2018*, shaqaalaha naafada ah iyo loo shaqeeyaha waa inay ku wargeliyaan Guddiga Shaqaalaha Naafada ee Fiktooriya haddii ay rumeysan yihiin inuu shaqaale ku kacay noocyo anshax xumo ah.

Qeybtaan ka mid ah Qorshaha Nidaaminta Nidaamka Naafada ee Shaqaalaha waxay ka caawineysaa in Guddiga Shaqaalaha Naafada ee Fiktooriya ay ka warqabaan halista ka imaan karta dadka isticmaala adeegga iinta, si aan si fiican uga hortagno uguna ilaalino dadka naafada ah waxyeellada. Ogeysiiska waa in la sameeyaa marka shaqaale naafonimo ama loo shaqeeye si macquul ah u aaminsan yahay in shaqaale naafada ah uu ku kacay dhaqan la ogeysiin karo.

Naga caawi dhisida quwadeena, si badbaado leh, qeybta naafonimada.



Guddiga Shaqaalaha Naafada ee Fiktooriya wuxuu hadda qaadaa cabashooyinka ku saabsan shaqaalaha naafada ee Victoria

Adeegayaga cabashooyinka waa mid madax banaan, eex la'aan iyo lacag la'aan. Wax ka qabashada cabashooyinka ku saabsan shakhsiyaadka shaqaalaha naafada ah, waxaan hiigsaneynaa inaan horumarino tayada, amniga, ka jawaab celinta iyo joogtaynta shaqaalaha naafada.

Diiwaangelinta shaqaalaha naafada ah ee dhaqaale la anta ah waxay bilaabmaysaa 1 Luulyo 2021

Waxaan fahamsanahay in cudurka faafa ee COVID-19 uu siyaabo kala duwan u saameynayo shaqaalaha naafada ah isla markaana uu sababay culeys iyo hubanti la'aan dhanka waaxda ah. Dib u dhigista diiwaangelinta 12 bilood ayaa u ogolaan doonta waqti shaqaalaha si ay uga soo kabtaan xiisadda ka hor inta aan lagu dhaqaaqin qorshe diiwaangelin cusub.

Ku saabsan Guddiga Shaqaalaha Naafada ee Fiktooriya

Guddiga Shaqaalaha Naafada ee Fiktooriya waa gole cusub oo madax banaan. Waxaa hogaaminaya Guddomiye Dan Stubbs, shaqadeedu waa inay sifiican u ilaaliso dadka naafada ah loona dhiso waax adag oo badbaado leh.

Waxay mas'uul ka tahay xeerka anshaxa, dejinta waxyaabaha ugu yar ee laga filayo dhammaan shaqaalaha taageera dadka naafada ah, iyo adeegga cabashooyinka. Markii la ogeysiyo, waxay awood u leedahay inay baarto oo ay mamnuucdo shaqaalaha khatarta gelinaya nabadgelyada dadka.

Booqo bogeena vdwc.vic.gov.au ama wac 1800 497 132

Iska diiwaan gali [newsletter](#) keena

Nala soco



vdwc.vic.gov.au
Wac 1800 497 132

